

Hagaha Qoyska



CMOA

Columbus
Museum of Art

Hagaha Qoyska

Waxaanu jecelnahay inay
ciyaalka iyo qoysaskooda
booqdaan matxafadeena!

Ama noqo qof qasid leh, qof ciyaar u yimid, ama shakhsigaada
muuji, qaab qaldan ee loosoo booqdo matxafka ma jira.

**Waa kuwan fikrado tusaalooyinka booqashada
loga dhigi karo mid waxtar leh:**



Hawsha Shaybaare: Waxaad u isticmaashaa 30
ilbiriqsi inaad wax walbo ka eegto sheyga farshaxan
intaadan aqrinii qoraalka faahfaahnayso. Dadka la qaybs
waxaad aragtay – ka sheekhee waxaad u malaynayo inuu
halkaasi ka socdo iyo sababtaa sidaa ugu malaysay.
Sidee sheekooyinkaada ula mid yihiin iyo sidey uga duwan yihiin?


Safar Yar Gal: Waxaad ku fakirtaa hadday surogal noqon
lahayd inaad dhex gasho sawirka ama farshaxanka. Maxaa
umalaysiaa inaad ka dhex maqli lahayd? Maxaad urin lahayd?
Maxaad taaban lahayd? Maxaad dhadhamin lahayd?
Makhluuq nooceeyaa ayaa halkaasi ku dhex noolaan kari lahaa



Jilitaanka Ciyaarta: Raadi sawir leh dad ama
xawayaan badan. Waaad jishaa inaad u ekaato qof -
ama shey! - ee sawirka ku dhex jiro ka dib na saaxibkaa
weydiin inuu isu dayo inuu garto waxaad jilayso.

Dib u Magacaabinta: Ku qaado waqtii inaad eegto
oo na ka hadasho sawirka. Ka dib na, magac cusub
u abaabul. *Muxuu magacaada ku tiican yahay?*





Deriska: Dooro labo sawir ama shey farshaxan oo is garab yaala. Iminka, ka fakir hadday noolaan lahaayeen. *Ma umalaysaa inay is jeelaan lahaayeen? Isu qoys mey ahaan kari lahaayeen?* Maxay ka wada hadlaan goorta ay dadka arkayn?

Cod: Haduu sheyga farshaxanka ama sawirka hadli kari lahaa ka waran? Cod noocuu bixin lahaa?



Dhadhanka: Ka waran haddaa cuni kari lahayd sheyga farshaxanka (laakin xusuusnaw taabashada lama ogol!) Raadi mid aad umalayo inuu cunidda ku ficnaan lahaa. *Dhadhanka noocuu ahaan lahaa? Miyuu noqon lahaa cunno khalafan, mid casiir leh, mid calal u baahan, ama cunno jilicsan? Macaan leh, dhanaan, ama dhadhan cusbo leh? Habkee iyo intee ku cunni lahayd?*

Sheyga Farshaxanka dul wareeg: Farshaxamaysteyaalka waxay jecel yihiin inay sheyda waqtii badan iyo xoog u fiiriyaan. Markaad ku sugar tahay matxafka ha iloowin inaad eegto kor, hoos, iyo geesaha sifo aad wax walba u aragto. Waxaa laga yaabaa inaad yaabto!



Dhammaan sawiraanta waxaa leh Amber Wacker

Daboolka: Martida yar waxay eegeysaa Lauren Halsey's *The National Council of Negro Women, Inc.* (2020). Waa hadiyadda Scantland Collection.

Tilmaanta Lagu Dabaqi Karo

Halkani waxaanu joognaa inaanu dad caawinno;
qof walbo oo sidan aqoonsiga
cagaaran ayaa su'aalaha kaaga jawaabi karaa oo na ku caawin karaa.
Halkani waxaad ka heli kartaa maclumaad guud:

- **Miiska Soo Dhawaynta** waxaa laga helaa gaari ciyaalka iyo qalabka caavinta ay ku jiraan qalabka yar oo farta lagu warwareejijo, saamacadaha dhagaha ee qaylida cuba, sheeko bulshadeed, iyo waxyaabo kale oo badan.
- **Qolka Raaxada** waa qol xasiloon, isticmaal badan leh ee ku yaalo musqulaha agrooda xagga Center for Creativity (Xaruunta Halabuurka). Waxaad halkaasi ka heli kartaa kursi, miiska ciyaalka labiska loga beddelo, buugta sawiraanta, iyo waxyaabe kale.
- **Jardiinka Farshaxanka la Qoray** waxay u furan tahay martida rabto inay si xor ah u dheq dhaqaan oo tamartooda u siidaayaan. Fadlan, meel fuul lama ogola.
- **Xaruunta JPMorgan Chase ee Halabuurka** waxay leedahay hawlaha ugu badan ee gacanta lagu qabto, laakin kuwo dheeraad waxaa laga dhex heli matxafka gudihiisa kale. Haddaad hubin inuu shey yahay mid lagu ciyaaro (la taaban karo) ama shey farshaxaneed (ahayn in la taabto) fadlan raadi qoraalka faahfaahinta ama waxaad weydiisa shaqaalaha matxafka.



**Hadduu jiro wax aanu ka
qaban karno inaanu kaa
caawino sifo ay u noqoto
booqashadaada mid
wacan, fadlan na ogeysii!**

columbusmuseum.org

480 E. Broad St.
Columbus, OH 43215